

Dibada Ma U Socotaa?

Qaado Tallalka Cagaarshowga A: Iilaali Nafsadaada Iyo Carruurtaada!

Hay'ada Caafimaadka Aduunka (WHO) waxay ku talineysaa qof walba oo ka weyn da'da hal, oo u safrayo in uu halis geliyo aagaga cagaarshowga A, si uu u qaato daawada.

Cagaarshowga A waa caabuqa beerka, ee sababo faayruska. Boqolkiiba 90% ee carruurta wadamada halista ku jiro, sida Hindiya iyo kuleelaha Afrika, waxay qaadaan oo la xanuunsadaan dhalashadooda tobanaad. Wadamada halisaha dhexdhaxaadka ama sareeyo waxaa sidoo kale ku jira Ruushka, wadamada Baltic, iyo wadamada gobolka Mediterranean (fiiri qariirada hoose).

Cagaarshowga A inta badan wuxuu ka gudbaa dhinaca waxyaabaha cuntada ama biyaha ku sumoobay saxarada. Faayruska sidoo kale wuxuu u gudbi karaa sida taabashada caabuqa si toos ah uga imaaday hal qof ilaa qof kale, ama dhinaca qalabyada musqusha.

Aastaanta ugu horeysa ee cagaarshowga A waxaa ku jira qandho yar, cunto yari, lalabo, calool xanuun, iyo kaadi madow. Qiyaastii hal isbuuc aastaamaha koowaad kadib, indhaha iyo maqaarka waxay bilowdaan inay cagaar noqdaan. Carruurta yar, gaar ahaan kuwa weli xiranayo baambaska, waxay noqon karaan aastaamo laakin wuxuu ku faafi karaa cudurka xarumaha daryeelka maalinta, tusaale.

Ma jirto daawo u jirto cagaarshowga A. Cudurka inta badan wuxuu ku bogsoodaa shaqsigiisa, waqtiga la siiyay. Si kastaba, dadka weyn waxay qaadan karaan bilooyin oo gabi ahaanba lagu boksoodo, sabab la xiriirta daalka dheer ee ay sababay jirada. Dadka qaar waxay hormariyeen caabuq duran oo beerka ah. Halistaan waxay ku darantahay uurka, jirooyinka qaar ee hoos yaala, iyo da'da sareyso. Dadka la dhibaatoonaya cagaarshowga A kumaharaan qaadayaasha cudurka.

Tallaalada ka hortago cagaarshowga A waxaa ku jira tallalka cagaarshowga A iyo isku darka tallalka, taas oo sidoo kale ka hortagtaa cagaarshowga B. halista tallaalada waxay bixisaa illaalo nolol dheer ee ka soo horjeedo labada nooca. Tallaallka waxaa laga soo iibsadaa farmashiga oo qoraalka daawada dhaqtarka.

